8011 34th Ave S., Suite 126
Bloomington, MN 55425
Office Phone: 612.728.5770
Office Fax: 612.728.5761
www.homelinemn.org

Minnesota waxa ay wajahaysaa caqabado culus oo sii kordhaya iyadoo dhexda looga jiro hawlgalada federaalka iyo rabshado socda, bulshooyinkeenu waxay dalbanayaan isbeddel macno leh. Bannaanbaxu waxa uu noqon karaa qalab awood leh oo lagaga hortago nidaamyada caddaalad-darrada wata laguna cadaadiyo hoggaamiyeyaasha inay tallaabo qaadaan. Isla mar ahaantaana, tallaabo-qaaditaannada sida joojinta bixinta kirada waxay xamilaan khataro sharci iyo mid dhaqaale oo culculus. Kireystayaasha hantida ee Minnesota waxay mudan yihiin xog waadix ah oo ku saabsan khatarahaas si ay u gaaraan go'aan xog-ogaal ay u yihiin kuwaas oo ku saabsan in haddii ka qaybgalka joojinta bixinta kirada si ka banaanbax ah ay tahay doorashada u saxda ah iyo in kale.

## Khataraha & Cawaaqibta Joojinta Bixinta Kirada

*Qoraalladan soo socda waxaa loogu talagalay u ujeeddo waxbarasho oo keliya mana aha talo sharci. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan xaaladdaada deggenaansho ee gaarka ah, waa inaad la xiriirtaa qareen.*

**Ma jirto ilaalin sharci oo si gaar ah u difaacda joojinta bixinta kirada.**

- Kireyste ayaa si sharci ah u joojin karaa bixinta kirada oo keliya marka ay jirto jebinta shuruudaha ku habboonaanta deggenaanshaha goobta (tusaale ahaan codsiyadda dayactirka ee aan laga soo jawaab-celinin). Haddii kireyste uu kirada u joojiyo oo keliya qaab bannaanbax ah, mulkiiluhu wuxuu xareysan karaa dacwad guri ka saaritaan.
- Qaar ka mid ah mulkiilayaasha guryaha ayaa isku dayi kara inay u hanjabaan ama ka aar-gudaan kireystayaasha ku lug leh banaanbaxa joojinta bixinta kirada. Minnesota waxay leedahay ilaalin xaddidan oo ka dhan ah aar-gudashada mulkiilaha hantida, balse fulinta xuquuqahaas waxay wadan kartaa khataro dheeraad ah.
- Inkastoo abaabulku, mararka qaarkood sharci ahaan uu yahay hawl kireyste oo la ilaaliyo, joojinta bixinta kirada ayaa lagu doodi karaa ineysan ahayn. Ugu yaraan, arrintani waa meel aan weli si buuxda loogu tijaabin sharciga xiriirka mulkiilaha iyo kireystaha. Mulkiilayaasha hantida ayaa awood u yeelan karaa ineysan cusboonaysiin heshiiska kirada, xitaa haddii kireystuhu kiradii ku bixiyo maxkamadda.
- Mid ka mid ah noocyada aar-goorsiga ayaa noqon kara in mulkiiluhu uusan cusboonaysiin heshiis kiradeedka xilliyeedka ah (bil-ilaa-bil). Ugu dambayn, tani waxay sababi kartaa barakicinta kireystaha, dacwad ka xareysashada ku salaysan sii deganaansho sharci-darro ah, ama khilaaf kale.

**Haddii dacwad ka saarid hantida la xareysto, waa la dhageysan doonaa xitaa haddii ay dib u dhac yar timaaddo sababo la xiriira kororka dacwado ka xareysashada maxkamada.**

- Ka hor inta aysan xareysan dacwadda ka saarid oo ku salaysan kirada oo aan la bixin, mulkiiluhu waa inuu bixiyo ogeysiis 14 maalmood ah oo waafaqsan sharciga gobolka. Magaalada Minneapolis, Brooklyn Center, iyo Saint Louis Park, mulkiiluhu waa inuu bixiyo ogeysiis 30 maalmood ah. Tani sidoo kale waxay khusaysaa mulkiilayaasha qaata inta badan kaalmada kirada ee dawladda (tusaale ahaan: Qeybta 8).
- Marka muddada kama danbeysta ah ee ogeysiiska ay dhammaato, mulkiiluhu wuxuu xareysan karaa dacwadda hanti ka saaridda. Dacwadaha ka saaridda hantida badanaa waxa la dhageystaa laba ilaa saddex toddobaad gudahood, balse waxeey qaadan karaan waqti dheer haddii hawlaha maxkamaduhu ay dib u dhaceen. Maxkamadaha Minnesota hore ayay u

maareeyeen koror ku yimid dacwadaha ka saaridda hantida kadib hakintii guri ka saarida ee la soo rogay intii lagu jiray cudurkii aafada ahaa. Inkastoo qaar ka mid ah dacwadaha dib loo dhigi karo, maxkamaddu waxay isku dayi doontaa inay kiis kasta ku dhageysato waqti loo igmaday.

- Joojinta bixinta kiradu waxay kireystaha u gelin kartaa khatar sare oo guri ka saarid ah sababo kale. Tusaale ahaan: kireystaha ayaaba horeyba u jebinaayay heshiiska kirada siyaabo kala duwan. Qaar ka mid ah mulkiilayaasha hantida way u fududatahay iney dib u daahfuran xadgudubyada buuqa ee horay u dhacay, jebinta xeerarka baarkinka, soo xareysashada xayawaannada rabaayadda ah ee aan laguu ansixinin, jebinta xeerarka martida, ama u diidida in mulkiiluhu galo qeyb ka mid ah guriga. Marka arrintu noqoto mid la xiriirta lacag kirada, mulkiiluhu wuxuu go'aansan karaa inuu gudbiyo dacwad ku salaysan sababo badan, oo ay ku jiraan kirada oo aan la bixin iyo jebinta heshiiska kirada.

**Ma jiro xaq sharci ah oo aad u leedahay in laguu qabto qareen marka dacwadda ka saaridu ku salaysan tahay kirada oo aan la bixin.**

- Xuquuqdaas waxay ku kooban tahay kireystayaasha guryaha dawladda marka dacwadda ka saaridu ku salaysan tahay jebinta heshiiska kirada (tusaale ahaan: qof aan laguu oggolaanin oo ku nool guriga).
- Inta badan dacwadaha ka saaridda hantida waxaa lagu go'aamiyaa dacwad dhageysiga ugu horreeya. Haddii aad seegto dacwad dhageysigaaga koowaad, si toos ah ayaad ugu guul-dareysatay dacwadda waan lagaa saari doonaa guriga. Kireyste ayaa codsan kara dacwad dhageysi maxkamadeed, balse kaliya haddii uu soo bandhigi karo difaac sharci ah oo ansax ah. Joojinta bixinta kirada sababo la xiriira dayactir aan la samayn waa difaac sharci ah, taas oo keeni karta in kiiska la dhageysto.
- **Joojinta bixinta kirada si ka qayb ah banaanbaxa bixinta kirada guryaha ma'aha difaac sharci ah. Xaaladdan, garsooruhu wuxuu u badan yahay inuu si degdeg ah ugu xukumo isagoo u danaaninayo mulkiilaha.** Si kastaba ha ahaatee, kireystaha waa in loo oggolaadaa inuu is-furto (bixiyo dhammaan kirada dib u dhaca ku yimid, ganaaxyada ka daahitaanka bixinta kirada, iyo khidmadaha maxkamadda, si uu guriga u sii deganaado) laakiin tani waxay ku kordhinaysaa kharashaad dheeraad ah kireystaha.

**Xaaladda ugu xun, ee kireystaha looga saari karo guriga laguna qasbi karaa inuu guuro.**

- Mararka qaarkood tani way dhici kartaa xitaa haddii kireystuhu awooday inuu is-furto (haddii kireystaha uu ka maqnaado maxkamadda sababo gaadiid awgood ama uusan awoodin inuu bixiyo khidmadaha dheeraadka ah).
- Sharciga gobolka wuxuu siinayaa kireystayaasha xaq ay isku-furtaan. Tani waxay ka dhigan tahay in waqti kasta ka hor dacwad dhageysiga ama inta lagu jiro dacwad dhageysiga, kireystuhu ku sii noolaan karo guriga haddii uu bixiyo dhammaan kirada dib u dhacday, ganaaxyada daahitaanka bixinta kirada, khidmadaha maxkamadda, iyo ilaa $5 oo khidmad qareen ah. Khidmadaha maxkamaddu guud ahaan waa qiyaastii $400–$450.

**Dacwadaha guryo ka saaridda waa kiisas madani oo dadweyne, waxaana lagu diiwaangeliyaa magaca kireystaha isla marka lasoo xareeyo. In lagugu diiwaangeliyo dacwad ka saarid hanti waxay si weyn qofka ugu adkaynaysaa inuu guri kirreysto sannado badan. Sidoo kale, waxay sababi kartaa in kireystuhu waayo kaalmada kirada ama warqadda oggolaanshaha ee foojarka haddii uu mid haysto.**

- Kireyste wuu codsan karaa in dacwadda guri ka saaridda laga tirtiro diiwaankooda, balse tani mar walba ma'aha mid la damaanad qaadi karo. Xitaa haddii la tirtiro, shirkadaha baarista ku sameeya kireystayaasha ayaa mararka qaarkood soo sheegaan. In kasta oo aanay ahayn iney sidaas sameeyaan, haddana way sameeyaan. Inkastoo kireystuhu ku khasbi karo shirkadda baaritaanka ku sameysa kireystaha inay joojiso soo sheegista warbixintiisa guri ka saaridda, haddana arrintani

waxay sababi kartaa inuu waayo guri uu dalbaday. Mulkiilihii guriga uu kireystaha horey u degganaa ayaa sidoo kale uga warbixin kara in dacwad ka saarid hantid uu gudbiyey marka mulkiilaha cusub uu ula xiriiro si ka tixraac ahaan ah.
- Iyadoo ku xiran xaaladda, dacwadda hanti ka saaridda ayaa sababi kartaa in kireystuhu waayo ka qeybgalkooda barnaamijka guryaha la kabo iyo/ama guri-qeybeedka la kabo ee uu ku noolaa.

**Waxaa sidoo kale jiri kara cawaaqib dhaqaale oo kale oo ka dhasha ka saaridda hantida.**

- Dhinacyadu ma helaan wax magdhow ah oo ku aadan waqtiga uga baxa maxkamadda (fasaxa maqnaansho ee ay kasoo qaadanayaan shaqada ama dugsiga).
- Inkastoo kireystuhu uusan bixin wax ka badan $5 oo khidmad qareen ah si uu isku-durto oo uu guriga ugu sii noolaado, mararka qaarkood khidmadaha buuxa ee qareenka mulkiilaha ayaa noqon kara deyn saaran kireystaha oo ay tahay in uun mar iska bixiyo.
- Xaaladaha marka uu kireystuhu awoodin inuu iska bixiyo deynta, tani waxay saameyn ku yeelan kartaa qiimeyntooda deynta ama awooddiisa inuu mustaqbalka guri kireysto.

---

**Soo Koobidda Khataraha Sharci:**

- Ku lahaanshaha lacag dheeraad ah marka lagu daro lacag-bixintaada caadiga ah ee billaha ah (kharashyada ka daahitaanka bixinta kirada, khidmadaha maxkamadda, iyo khidmadaha qareenka—waxay noqon karaan $400+)
- Guuritaan qasab ah
- Luminta kaalmada kirada
- Dib-u-cusboonaysiin la'aanta heshiiska kirada
- Dhibaatooyinka soo jireenka ah ee deynta iyo lacagta kirada ee muddada dheer
- Hanjabaadyo/aargudasho ka imaada mulkiilaha

**Dadka Khatarta Sare Ugu Jira:**

- Kiraysteyaasha aan awoodin inay bixiyaan khidmadaha dheeraadka ah ee la xiriira guri ka saarista.
- Kiraysteyaasha hela kaalmada kiro-bixinta.
- Kiraysteyaasha dhibaato ku qabi kara inay soo xaadiraan ama ay isku matalaan maxkamadda sababo la xiriira caqabadaha luqadda, gaadiid-raaca, ama shaqada.
- Kiraysteyaasha ku jira heshiiska guri kireysiga bil-ilaa-bisha kale ah ama heshiis kiro oo dhawaan dhici kara.
- Kiraysteyaasha la degganayaasha leh- haddii qof qol wadaag ahi uusan bixin kiradooda, ka saarista hantidu waxeey ku dabaqmi doontaa dhammaan kiraysteyaasha.

---

Waxaan wadaageynaa macluumaadkan si kiraysteyaasha ku nool Minnesota ay si buuxda u fahmaan cawaaqibta ka dhalan karta ka qaybgalka banaanbaxa lagu joojinaayo bixinta kirada oo ayna qaataan doorashada ugu muuqata mid sax ah. Ma jirto jawaab ah hal-cabbir-ayaa-ku-wada-habboon-dhammaantooda. Xaaladda kireystaha kasta way ka duwan tahay kan kale, go'aanka saxda ahna wuxuu ku xirnaan doonaa duruufaha shaqsiyeed, mudnaanaha, iyo u dulqaadashada wixii khatar ah ee ka dhasha. Haddii aad rabto inaad xaaladdaada gaarka ah kala hadasho qareen, fadlan la xiriir khadka taleefanka ee kiraysteyaasha HOME Line barta homelinemn.org/email.